



Taariikhda:

Gacaliye Qoys:

Ma ogtahay in carruurta caafimaadka qabtaa ay iskuulka ku fiican yihiin? Waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameeyn karto si aad uga caawiso carruurtaada inay caafimaadqabaan. Markii ay arkaan carruurtaada adigoo sameeynaya doorashooyin caafimaad leh iyaguna sido kale ayay sameeyn doonaan.

Waxaanu taageernaa barnaamij la yiraahdo **Ready, Set, Go 5210**. Waxa uu qoraya afar doorasho oo aan dhamaanteen sameeyn karno:

5

Cun ugu yaraan **5** mar qudaar iyo miro maalin kasta. Marki ay carruurta arkaan adigoo cunto caafimaad leh cunaya ayaguna waxay dooni doonaan inay cunaan.

2

Fiiro **2** saacadood ama wax ka yar shaashadda. (Carruurta ka yar labo jirku waxay leeyihiin **0** saacadood oo xiliga muraayada.) Kula cayaar banaanka ama wax ugu aqri cunugaada. Carruurta muddo yar fiirsada shaashadd waxay ku fiicnaadaan iskuulka. Ka saar TV/Komputerka qolka carruurta si aad uga caawiso cunugaagu inuu diyaar u ahaado iskuulka.

1

Jimicso ugu yaraan **1** saac maalin kasta! Orod, bood, raac baaskiil ama bannaanka ku soco. Carruurta jimacsata maalin walba waxay ku fiican yihiin iskuulka.

0

Tirada **0** ayaa ka muuqata inta xabo ee cabbitaanka sonkorta leh oo aanu helaynaa. (Cabbitaanka sodhada, cabbitaanka isboortiga, juuska, cabbitaanka juuska, iwm) Cab caanaha subagu ku yar yahay ama biyo markii aad ooman tahay. (Carruurta u dhaxaysa 12 bilood ilaa 2 sanno jirku waa inay cabaan caanaha subaga buuxa leh.) Biyuhu waa doorasha ugu fiican ee cuntooyinka inta u dhaxaysa waana fududahay si loogu qaato socdaalada dibedda ka ah guriga.

Waxaanu guriga kugu soo diri doonaa fikrado dheeraada oo ku saabsan sidii doorashooyinka caafimaadka leh aad u sameeyn lahayd. Fadlan noo sheeg waxyaabaha uu qoyskiinu sameeyo si ay u caafimaad qaban si aanu ula wadaagno qoysaska kale.

Waxaanu doonaynaa inaanu kala shaqeeyno inaanu ka caawino sida uu cunugaagu ugu diyaargarobi lahaa Kingergarten-ka. Xasuusnow, carruurta caafimaadka qabtaa in ay iskuulka ku fiican yihiin.